

## **Dib ayaa loo dhigay heerka 4-aad**

**Walaac laga qabo nooca Delta ee fayruska iyo kor-u-kac ku yimi is-qaadsiinta cudurka ee halkan Norway iyo caalamkaba ayaa sabab u ah in dawladdu go'aamisay in aan hadda loo gudbin heerka 4-aad ee qorshaha dib-u-furidda waddanka. Badhtamaha bisha Ogos ayaa la samayn doonaa qiimayn cusub oo ku saabsan in loo gudbi karo heerka 4-aad.**

Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha ayaa dawladda kula taliyay in ay heerka 4-aad dib u dhigto muddo labo toddobaad ah.

- Cudurkii safmarka ah weli ma dhammaan. Waddamo badan oo Yurub ah waxa ka jira isbeddello walaac leh oo nooca Delta ee fayrusku sabab u yahay, oo ay ka mid yihiin waddamo Norway kaga horreeya tallaalka dadka, sida Ingiriiska iyo Holland. Waxa aan la hubin sida nooca Delta u saamayn doono Norway marka la eego dhinaca is-qaadsiinta cudurka iyo sida dadku ugu xanuunsanyiyaan ba. Dawladdu waxa ay taas darteed dooratay in ay qaadata talada Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynaha, oo ah in dib loo dhigo heerka 4-aad ee qorshaha dib-u-furidda, ayuu yidhi wasiirka caafimaadka iyo dadweynaha - Bent Høie.

Nooca Delta ayaa xagaagan noqday nooca fayruska ee ugu badan Norway, waxaana sii kordhaya qaybta dadka qaaday noocan fayruska. Agaasinka Caafimaadka iyo Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa ay jawaabtii laga codsaday ku sheegeen in weliba isbeddelkan Norway iyo caalamka ku yimi maalmihii u dambeeyey uu tilmaamayo in dib loo dhigo dib-u-furidda.

## **Maalmaha iskuulka oo caadi ah**

Dhammaan muddadii cudurka safmarka ah socday waxa dawladdu mudnaanta siisay carruurta iyo dhallinyarada. Hadda waxa aad u muhiim ah in la suuraggeliyo sidii iskuullada loo furi lahaa iyadoo ku jira heerka cagaarka ah. Taasi waxay u baahan tahay in si wacan loo xakameeyay faafitaanka cudurka.

- Waa in aynu samayno wax kasta oo aynu awoodno si carruurta iyo dhallinyaradu u helaan maalmo iskuul oo caadi ah, marka ay ka soo laabtaan fasaxa. Haddii hadda la sii kordhiyo dib-u-furidda bulshada waxa dhici karta in iskuullo badan la furo iyadoo ku jira heerarka huruudda ama casaanka, taas oo dhib ku noqonaysa carruurta iyo dhallinyarada, ayuu yidhi Høie.

Si kastaba waxa wacan in xannaanooyinka, iskuullada iyo SFO-yada ku yaalla meelaha cudurku ku badan yahay ay isu diyaariyaan heerka huruudda ah. Waxay arrintani gaar u khuseysaa xannaanooyinka iyo SFO-yada, oo iyaga bisha Ogos laga hor furayo iskuullada.

## **Dhallinyarada ka yar 18 sanno waa laga dhaafayaa karantiilka u dhawaanshaha cudurka**

Istaraatiijiyadda TISK (tijaabo-qaadis, gooni-u-bixid, raadraacidda cudurka iyo karantiilka) ayaa ka mid ahaa tallaabooyinka ugu muhiimsan ee lagu xakameeyay cudurkii safmarka ahaa ee ka jiray Norway. Tallaabooyinkani waxay saamayn ku yeeshen meelo badan, sida dadka, degmooyinka, iskuullada, xannaanooyinka carruuraha iyo shaqooyinka ba. Taas darteed waxa muhiim ah in wax laga beddelo tallaabooyinka si ay u noqdaan kuwo u dhigma xaaladda cudurka ee jira.

Xeerarka maanta jira waxay sheegayaan in dadka aan difaacnayn ee u dhawaada qof cudurka laga helay ay karantiil galaan 10 maalmo. Muddada karantiilka waa la soo gaabin karaa haddii 7 maalmo kaddib la iska qaado tijaabo PCR ah oo islamarkaana cudurka laga waayo.

Laga bilaabo 16-ka Ogos waxa carruurta iyo dhallinyarada ka yar 18 sanno laga dhaafayaa karantiilka u dhawaanshaha, iyadoo laga reebayo dadka guriga la deggan ama dadka la midka ah ee u dhawaaday qofka cudurka laga helay, tusaale ahaan saaxiib/saaxiibad. Karantiilka waxa la dhaafayaa keliya haddii tijaabo la isaga qaado si waafaqsan nidaamka degmada. Waxa la diyaarin doonaa tilmaamo heer qaran ah oo ku saabsan nidaamka tijaabooyinka ee degmooyinka ku habboon. Waa in qofku karantiilka galo haddii aanu tijaabo isaga qaadin si waafaqsan nidaamka tijaabo-qaadista.

- Waa in aynu ka hortagno in carruurta iyo dhallinyarada la geliyo karantiil oo markaana ay in badan ka maqnaadaan iskuulka marka dib loo furo iskuullada oo ku jira heerka cagaarka ah. Maadaama aan ardayda loo qaybin doonin kooxo joogto ah marka lagu jiro heerka cagaarka ah waxa muhiim ah in dadka ka yar 18 sanno laga dhaafo karantiilka, si looga badbaado in mar kasta oo qof cudurka laga helo ay arday badan maqnaadaan oo iskuulkuna si buuxa u shaqayn kari waayo, ayuu yidhi Høie.

Dadka 18 ka weyni waa in ay weli galaan karantiilka u dhawaanshaha, laakiin degmooyinka waxa loo oggol yahay in ay qofka ka dhaafaan karantiilka oo ku beddelaan in qofka tijaabo laga qaado. Waxa wacan in degmooyinku si gaar ah uga fekeraan in ardayda dugsiyada sare ee ka weyn 18 isla markaana aan difaacnayn laga dhaafo karantiilka u dhawaanshaha.

## **Waxyaalo yaryar ayaa laga beddelay heerka 3-aad**

Waxyaalo yaryar ayaa laga beddelayaa heerka 3-aad. Wax-ka-beddelladani waxa ay dhaqangalayaan saqda dhexe, habeenka Isninta 2-da Ogos.

- Maanta waxa carruurta iyo dhallinyarada loo oggol yahay ka qaybgalka qabanqaabooyinka ciyaaraha iyo dhaqanka, sida tartannada ciyaaraha, iyagoo

isaga kala gudbi kara gobollada iyo degmo-ciyaareedyada. Waxa hadda la oggolaanayaa in dadka waaweyn iyana sameeyaan sidaan oo kale.

- Shirkadaha iyo ururrada raba in ay isu-imaatinno u qabtaan shaqaalahooda, sida isu-imaanshooyin kick-off ah, waxa laga rabay in ay ku dhaqmaan xeerarka qabanqaabooyinka gaarka ah. Taasi waxa ay keentay in dadka ka qaybgeli kara kulannada noocan ah ka yar yihiin dadka ka qaybgeli kara kulannada aqoonkorodhsiga ah. Kulannada noocan ah waxa hadda laga bilaabo loo aqoonsanayaa in ay yihiin qabanqaabooyin guud. Waxa shardi ah cid aan shirkadda ahayni in ay maamulayso qabanqaabada.
- Waxa xayiraadaha soo gelidda waddanka laga dhaafayaa carruurta da'yarta ah ee Norway imanaya iyadoo la socda waalidkooda oo xayiraadaha soo gelidda lagaga dhaafay sababo kale oo aan ahayn shahaadada koroonaha. Carruurta la socda waalidkooda oo xayiraadaha soo gelidda laga dhaafay maadaama ay haystaan shahaadada koroonaha, waa ay soo geli karaan waddanka oo hore ayaa looga dhaafay xayiraadaha.
- Doomaha rakaabka qaada ee ka baxa waddan cagaar ah oo aada waddan karantiilku waajib ku yahay qofki taga, laakiin aan halkaas ka soo qadin rakaab kale, looma arko in ay yihiin gaadiid dadweyne marka la eego xeerarka xeer-hoosaadka covid-19 ee ku saabsan karantiilka soo gelidda ee laga dhaafayo dadka socdaalka ah ee wakhti kooban soo joogay meelo karantiilku waajib ku yahay qofkii soo joogay.

### **Wax-ka-beddello lagu sameeyay heerka 4-aad – hadda lama dhaqangelinayo**

Inkastoo dawladdu go'aamisay in aan hadda loo gudbin heerka 4-aad, waxa la go'aamiyay in waxyaalo yaryar laga beddello heerka 4-aad oo soo raacaya waxyaalihii hore loo beddelay. Inkastoo aan hadda la dhaqangelinayn wax-ka-beddelladan, haddana waxa la rabaa in hadda la sii sheego, si dadka iyo meelaha wax-ka-beddelladu saamaynayaan ay ugu sii xisaabtamaan.

Waa kuwan waxyaalaha la beddelay heerka 4-aad ee qorshaha dawladda ee dib-ufuridda bushada:

- Ilaa 500 qof ayaa joogi kara qabanqaabooyinka gaarka ah.
- Shardigii ahaa in dadka ka qaybgalaya qabanqaabooyinka la isticmaalayo shahaadada koroonaha loo qaybiyo kooxo joogto ah oo midkiiba yahay ugu badnaan 500 qof.
- Heerka 4-aad waxa la kordhinayaa tirada dadka ka qaybgeli kara qabanqaabooyinka firfircoonida iyo waxyaalaha kale oo la qabto wakhtiga firaqada la yahay ee isu keenaya dad badan islamarkaana soconaya maalmo badan, waxay ahayd 300 qof waxaana laga dhigayaa 500 qof.
- Jaamacadaha iyo dugsi-xirfadeedyadu waxa ay qaban karaan cashar-bixinno ardaydu goobjoog tahay oo shardigii kala fogaanshaha laga dhaafayo inta cashar-bixintu socoto.

Waxa la go'aamiyay in heerka 4-aad lagu sameeyo wax-ka-beddelladan khuseeya qabanqaabooyinka:

- Waxa la joojinayaa madnuucistii soo daynta dadka wixii ka dambeeya saacadda 24.00 marka la qabanayo qabanqaabo loo oggolaaday khamriga.
- Waxa la joojinayaa shardigii ahaa in dadka qabanqaabada jooga miiska loogu geeyo khamriga. Waxa lagu beddelay shardi ah in qofka kasta haysto kursi haddii ay tahay qabanqaabo loo oggolaaday khamriga, laakiin shardigan lagama rabo qabanqaabooyinka la isticmaalayo shahaadada koroonaha.
- Waxa qabanqaabooyinka la isticmaalayo shahaadada koroonaha laga dhaafayaa shardigi kala fogaanshaha.
- Soo-bandhigeeyaasha aan xirfadleyaal ahayn ee soo bandhiga qabanqaabooyinka dhaqanka waxa laga dhaafay shardigii ahaa in la kala fogaado 1 mitir.
- Xeer-hoosaadka ayaa lagu darayaa in dadka difaacan ee wada socda ay isu soo dhawaan karaan marka ay fadhiistaan qabanqaabo la isticmaalayo kuraasyo meel ku dhegan.
- Waxa la joojinayaa madnuucistii in dadka la fadhiisiyo in ka badan kala badh kuraasta meel ku dhegan, marka aan jiho kasta la kala fogaan karin 1 mitir.
- Waajibaadka saaran qabanqaabiyaha ee ah inuu qaado tallaabooyin lagu xaqiijinayo kala fogaanshaha ka qaybgalayaasha ayaa khuseyn doona xataa qabanqaabooyinka guud ee aan la isticmaalayn boosas fadhi oo joogto qofkana loo tilmaamayo.